

Guryaynta qiimaha jaban ayaa kusoo badanaysa gudaha Calgary

Sebtembar 29, 2022

Bartamaha magaalada Calgary ayaa hadda laga heli karaa dookhyada kaladuwan ee guryaha qiimaha jaban, kaalmooyin iyo adeegyo – kuwaas oo hal meel ku wada diyaarsan.

HomeSpace Society, oo ah haayad khayri ah oo guriyaynta ka shaqaysa, ayaa hadda dhamaysay u badalidda xafiiska Sierra Place ee 10ka dabaq ah guryo loogu tala galay dadka reer Calgary ee u baahan. Ayada oo gadaal looga bixiyay magaca Neoma, si uu uga tarjumo naxariis iyo bilow cusub, dhismuhu wuxuu leeyahay 82 qaybood oo guryaha qiimaha jaban ah iyo 10 qaybood oo ah xarumaha hooyga iyo guryaha ku meel gaarka ah. Waxaa sidoo kale kujira xaafiis iyo goob loogu tala galay diyaarinta barnaamijyada Inn from the Cold iyo adeegyo loogu tala galay kiraysteyaasha.

Dowladaha Alberta iyo Canada mid kasta wuxuu ugu deeqay \$1 milyan mashruucaan ikhtiraaca leh. Mashruucu wuxuu taageeray ku dhawaad 220 shaqo.

“Qof kasta oo muwaadin reer Canada ah wuxuu u qalmaa meel ammaan ah oo uu awoodo oo uu ku noolaado. Ayada oo looga mahad celinayo Rapid Housing Initiative, dowladdeenu waxay ka dhabaynaysaa arinkaan ayada oo si dhakhso ah u siinaysa guryo qiimo jaban inta badan shakhsiyaadka nugul ee guud ahaan Canada, oo kujiraan kuwa ku nool halkaan Calgary. Arintaani waa mid kamid ah qaababka faraha badan ee Istiraatiijiyadda Guryaynta Qaranka ee dowladeenu kusii wadayso xaqiijinta in uusan jirin qof laga qadiyay adeegyada.”

Ahmed Hussen, Wasiirka Guryaynta, Kala duwanaanshaha dadka iyo Isku dhammaanshaha ee federaalka

Xaqiiqooyin kooban

- Mashruuca oo dhan kharashkiisu wuxuu ahaa \$30 milyan. Waxaana kamid ahaa:
 - \$2 milyan oo ka yimid Dowladda Alberta iyo Dowladda Canada
 - \$16.6 milyan oo ka yimid Canada Mortgage and Housing Corporation ayada oo la marsiiyay Hindisaha Guryaynta Degdega ah ee Wajiga 2 (Phase 2 Rapid Housing Initiative) (RHI)
 - \$5.7 qaaraan aruurinta Collaborative Capital Campaign
 - \$5.5 oo ka timid Magaalada Calgary
 - \$200,000 oo ka timid Canada Mortgage and Housing Corporation oo kamid ah Seed Funding
- Qorshaha loogu tala galay Dhaqaalaha Dadka Waawayn iyo Guriyaynta ee Alberta (Alberta Seniors and Housing's Capital Plan) 2022 wuxuu \$281 milyan u qoondeeyay saddexda sanno ee soo socota in uu ku bixiyo guryayn 2,300 ah oo cusub, lana soo saaray asaga oo islamarkaasna taageeraya 2,000 shaqo.
- Istiraatiijiyadda Guryaynta Canada(Canada's National Housing Strategy) (NHS) waa qorshe 10 sanno ah, oo ay ku baxayso lacag ka badan \$72 bilyan kaasoo siin doona muwaadiniin badan oo ree Canada ah meel ay ugu yeeraan guri.
- NHS waxay ku dhisan tahay iskaashi adag oo u dhexeeya dowladaha federaalka, goboleedka iyo dhulalka waxayna sii waddaa in ay la falgasho qaybaha kale, oo ay kujiraan dowladaha hoose, dowladaha Asalka ahaa iyo ururada, iyo qaybaha gurayayta bulshada iyo kuwa gaarka loo leeyahay. Arintaan waxaa kamid ah wada tashi lala samaynaayo muwaadiniinta ree Canada ee ka socda dhammaan qaybaha kala duwan iyo dadka wajahaya baahi dhanka guryaynta ah.

Lifaaqyada la Xariira

Maadaama ay tahay wakaaladda guryaynta Canada, Canada Mortgage and Housing Corporation (CMHC) waxay ka qayb qaadanaysaa xasilinta suuqa guryaynta iyo hannaanka dhaqaalaha, waxay kaalmo siisaa muwaadiniinta ree Canada ee qaba baahiyaha guryaynta, waxayna keentaa cilmibaaris guryaynta ku saabsan oo isu dheelitiran iyo talo bixin ay siiso dhamma an heerarka dowladdaCanada, dadka adeegsada, iyo waaxda guryaynta. Wixii macluumada dheeraad ah, fadlan bookho [cmhc.ca](https://www.cmhc.ca) ama nagala soco Twitter, Instagram,

YouTube, LinkedIn, iyo Facebook. Si aad u ogaato waxyaabo badan oo ku saabsan NHS, bookho [placetocallhome.ca](https://www.placetocallhome.ca).

Wasaaradda Dadka waaweyn iyo Guryaynta ee Alberta waxay sare u qaadaysaa horumarinta guryaynta qiimaha jaban waxay taageertaa xulashooyinka helitaanka guryaha ee dadka ree Alberta ee baahida badan u qaba. Wasaaraddu waxay la shaqaynaysaa dadka waaweyn, qoysaskoda iyo daryeel bixiyeyaasha, dadka ree Alberta ee u baahan kaalmooyinka guryaynta, iyo bulshooyinka iyo saaxiibada kale ee dowladda. Tafaasiil aad u faahfaahsan oo ku saabsan wasaaradda iyo barnaamijyadeeda iyo hindisayaasheeda ayaa laga heli karaa alberta.ca/ministry-seniors-housing.aspx.

Macluumaadka la xiriira

- [Istiraatiijiyad aasaas adag oo guryaynta qiimaha jaban ah](#)